

# INJIRTA MADAXA

## WAA MAXAY INJIRTA MADAXA?

Injirta madaxa waa cayayaan yaryar oo ku nool dusha qalfoofka madaxa. Cayayaankaan ayaa dhuuqa dhiigaaga si ay u noolaadaan, laakiin lama oga cudur ay faafiyaan.

## MAXAY TAHAY INAAD SAMEEYO?

Injirta madaxa ayaa ku badan carruurta. Cayayaankaan ayaa caadiyan faafa marka madaxa isku taabataan qof qaba injir.

## SIDEE AYAAN KU OGAANAYAA HADDII AAN INJIR QABO?



Waxaad dareemaysaa xanxanto kaa haysa madaxa.



Waxaad dhibaato ku qabaysaa inaad seexato.



Madaxa ayaad xoqaysaa ilaa ay nabaro kaasoo baxaan.



Ka fiiri nabaro ama cayayaan cadad oo ku jira timahaaga.

## SIDEE AYAAN UGA HORTAGI KARAA?



Ha taabsiin madaxagaaga madaxa qof kale.



Ha la wadaagi dadka alaabta sida koofiyadaha ama shanlooyinka.



Ha ku seexan isla gogosha uu ku seexdo qof qaba injir.

## TILMAAMAHA DAAWAYNTA:



Adeegso daawada aad kasoo gadato dukaanka

- si aad u dawayso injirta. Ku shanlee timahaaga
- shanlo isku shiilan 8-12 saacadood kadib daawaynta.

## MARKA AY TAHAY INAAD DHAKHTAR WAYDIISO?

Waa inaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga haddii aad wali qabto injirta madaxa kadib daawaynta buuxda (sida lagu qoray tilmaamaha). Wuxuu dooni karaa inuu ku siiyo daawo awood badan sida Ivermectin.